



**PORTLAND
Public Schools**



Cusboonaysiinta Mashruuca Casriyeynta Jefferson ee May 2024

Fariintani waa qayb ka mid ah taxane joogto ah oo cusub oo ka yimid kooxda Mashruuca Jefferson si ay kuugula socodsiyaan marka mashruuca Casriyeenta Jefferson uu marayo wejigiisa naqshadaynta. Waa xad ka akhrisan kartaa wararkii hore [halkan](#).

Tan iyo wixii ka dambeeyay warkii u dambayay, Kooxda Mashruucu waxay sii wadeen daraasadda shuruudaha qorshaha cusub ee lagu dhisayo Dugsiga Sare Jefferson ee dhinaca woqooyi ee dhulka. Waxay dejiiyeen taariikhaha muhiimka ah ee mashruuca naqshadaynta, oggolaanshaha, dhismaha iyo dhammaystirka qorshaha cusub si loo horumariyo jadwalka mashruuca oo la cusboonaysiiyay:

- Naqshadeynta & Warqadaha: May 2024 - Oktoobar 2025
 - Isticmaalka Dhulka & Oggolaanshaha: Febraayo 2025 - Febraayo 2026
 - Dhismaha: Xagaaga 2025 - Dayrta 2028
 - Ardayda iyo shaqaaluhu waxay u guuri doonaan dhismaha cusub: Dayrta 2028
 - Shaqada goobta ayaa sii socota: Dayrta 2028 - Dayrta 2029

Ardyada iyo shaqaaluhu waxay joogi doonaan goobta inta lagu jiro dhammaan muddada dhismaha. Dhismuhu wuxuu bilaabmayaa xagaaga 2025 . Ardayda iyo shaqaaluhu waxay u guuri doonaan dhismaha cusub dayrta 2028. Shaqada goobta iyo garoommada way sii socon doontaa ka dib markay ardayda iyo shaqaaluhu joogaan dhismaha cusub, oo dhammaan doona bartamaha 2029.

Kooxdu waxa kale oo ay haysaa miisaaniyad lagu qiyaasay mashruuca oo dib loo eegay: \$491 milyan. Tiradan waxa ku jira qiyaasha dhismaha ee Andersen Construction (qandaraaslaheena) oo ay taageerayaan qiimeeye kharashka madax banaan oo gooni ah (Rider Levett Bucknall). \$491 milyan aya ka badan miisaaniyadii hore, markaa waxaan u baahan doonaa inaan raadino maalgelin dheeri ah si aan u dhamaystirno mashruuca. Tani waxay la mid noqon doontaa tii dhacday markii Benson la casriyeeyay: maalgelinta bilowga ah waxay ka timid Bond 2017 iyo maalgelinta dheeriga ah ee Bond 2020.

Kooxda maamulka Jefferson iyo Kooxda Mashruuca ayaa ka wada shaqeeyay sidii ay u samayn lahaayeen **qorshe cusub la soo jeediay oo bulshada lagu wacyigelinayo.**

Kooxda Mashruucu waxa ay cusboonaysiyeen Guddiga Waxbarashada Xarumaha iyo Hawlgelinta 20-kii Maarsa iyo Guddiga oo dhamaystiran 2-dii Abriil. Waxyaaшибii la soo bandhigay waxaa ka mid ahaa:

- Isbarbardhigga qorshayaashii hore iyo kuwa cusub ee casriyeynta.
- Qaybaha muhiimka ah ee qorshaha casriyaynta cusub.
- Fikradaha lagu yareynayo saameynta ciyaaraha fudud inta lagu jiro dhismaha.
- Qorshaha wacyigelinta bulshada ee la soo jeediyay.
- Qorshaha ogolaanshaha iyo la shaqaynta Magaalada Portland.
- Jadwal mashruuc oo la cusboonaysiiyay
- Qiimaynta kharashka oo la cusboonaysiiyay iyo faahfaahinta waxa sababay kor u kaca kharashka mashruuca.

Guddiga Waxbarashadu waxay xaqijiyeen shirkii Abriil 2, 2024, in Mashruuca Casriyeynta Dugsiga Sare Jefferson uu hadda u gudbi doono marxaladda naqshadaynta qorshaha cusub, oo uu ku jiro qorshaha cusub ee wacyigelinta bulshada kaas oo keeni doona fikradaha xubno badan oo bulshada ah iyo ururada shuraakada ah habka naqshadaynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca fadlan booqo

<https://www.pps.net/JeffersonBond>. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa su'aalo ama la wadaagi kartaa fikradahaaga Kooxda Mashruuca halkan JHSBond@pps.net. Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay abuuritaanka Dugsiga Sare Jefferson cusub qarniga 21aad.